

maqaarku bogsadaan.

Shaqaalaha isbitaalku waa inay sidoo kale kugula taliyaan jimicsiyada miskaha (Kegel), maaddaama kuwani ay si weyn kaaga caawin karaan in calooshada iyo kaadi-haystaadu ku soo noqdaan sidii caadiga ahayd toddobaadyada soo socda.

Maalmaha ugu horreeya, waxaa muhiim ah in la qaato xanuun -baabiyaha lagu qoray, maaddaama ay kaa caawin doonaan inaad maareyso xanuunkaaga oo aad dareento raaxo badan qalliinka ka dib.

Dadka intiisa badani waxay fasax ka qaataan shaqada marka hore mana ku noqdaan shaqada ugu yaraan laba toddobaad si ay jidhkooda iyo shucuurtooda u siiyaan waqti ay ku bogsadaan qalliinka daloolka-yar ka dib waxaana waqtigaas laga dhigi karaa qiyaastii lix toddobaad haddii caloosha lagu sameeyo qalliin weyn. Boggayaga internet-ka waxa ku jira macluumaad ku saabsan uurka ektoobiga iyo goobta shaqada.

Dareenkaaga

In lagaa daaweeyo uur ektoobigii waxay noqon kartaa waayo-aragnimo walaac iyo cabsi leh. Ka sokow culeyska jireed ee daaweynta, waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad si dareen leh iskaga dhaadhiciso wixii dhacay. Way adkaan kartaa in aad fahanto oo dareenku si fiican u muuqdo. Dadku waxay inta badan dareemaan dareeno kala duwan oo isku qasan taasina waa mid la fahmi karo oo caadi ah. Sii naftaada waqti iyo meel aad ku soo kaban karto jidh ahaan, maskax ahaan iyo dareen ahaanba.

Dadka badankood, ka dib markay la kulmaan dhacdo adag, waa jawaab dabiici ah inay isku dayaan inay macno

u yeelaan waxa dhacay iyo sababta ay u yeeshen uurka ektoobiga. Isku dayga inaad fahanto sababta aad u yeelatay uurka ektoobigu waxay noqon kartaa wax kugu abuura laacwaa maaddaama inta badan ay xadidan yihiin ama xitaa aan lahayn jawaabaha su'aalaha.

Qaarkood waxay dareemaan dambi waxayna xitaa isku eedeeyaan inay "sababeen" ama gacan ka geysteen uurka ektoobiga. Waxaa muhiim ah in aad qirto in aysan jirin wax aad sameyn kartay si aad u joojiso dhacistaanka uurka ektoobiga iyo in aadan adigu khaladka lahayn. Maad lahayn ikhtiyaar kale oo aan ahayn in lagaa daaweeyo uurkaaga ektoobiga maxaa yeelay waxay halis gelin lahayd noloshaada haddii aan laga daaweyn lahayn.

In ka badan kala badh uurka ektoobiga ee Boqortooyada Midowday(UK), ma jirto khatar la og yahay ama waxyaallo keeni karata uur ektoobiga.

Dareenka lammaanahaaga

Uurka ektoobigu waxa uu sidoo kale saameeyaa lammaanayaasha. Iyaga oo isku dayaya inay ka baaraandegaan waxa ku dhacay naftooda, waxay isla markaa isku dayi karaan inay ku siiyaan taageero ka dib markay arkaan dhibta jidheed iyo shucuureed ee aad martay.

Lammaanahaaga ayaa laga yaabaa in uurku uusan saamayn. Waxaa laga yaabaa inay isku dayayaan inay wax ka qabtaan falcelintooda shucuureed ee ku aadan uurka lumay markhaatinna ka noqonaya dhaawaca soo gaadhay jirkaaga iyo dareenkaaga. Dadka qaar, waxaa laga yaabaa in ahmiyadda lamaanuhu adiga uu yahay halkii uu ka ahaan lahaa uurkii lumay taasina waxay noqon kartaa meel la isku afgaran waayo. Mararka

qaarkood lammaanahaaga ayaa laga yaabaa inay ku adkaato inuu fahmo dareenkaaga waxaadna u malayn kartaa in lammaanahaagu uusan ku taageerayn sidii aad jeclaan lahayd. Lammaanayaashu waxay isku dayi karaan inay "wax hagaajiyaan" ama waxay rabi karaan inay ka fogaadaan ka hadalka waxa dhacay ama soo hadal qaaditaanka mowduuca xanuunka badan. Sababtu maahan inaysan danaynayn laakiin waxay rabaan inay "wax hagaajiyaan". Iyada oo inta badan ahmiyadda adiga lagu saarayo, waxay sidoo kale dareemi karaan in laga tegey oo la iska indho tiray. Lammaanayaashu sidoo kale waxay la kulmi karaan dhibaatooyin nafsiiyeed ka dib uurka ektoobiga sida walbahaarka dhibaataada ka dib.

Waxaa muhiim ah, marka aad dareento inaad awooddo, inaad lammaanahaaga kala hadasho dareenkaaga iyo dareenkooda labadaba. Waxaan sidoo kale halkan u joognaa inaan ka taageerno lammaanayaasha dhibka uurka ektoobiga.

Sidee Hay'adda Uurka Ektoobigu u bixin kartaa taageero?

Hay'adda Uurka Ektoobigu waxay bixisaa macluumaad waxayna taageertaa kuwa waaya uurka goor horre, oo ay qabsato masiibada uurka ektoobigu.

Markay timaaddo Hay'adda Uurka Ektoobiga, in badan oo naga mid ah waxay soo mareen dhaawac jireed iyo mid shucuureed oo uu sababay uurka ektoobigu sidaa darteed waan fahmaynaa oo u damqanaynaa sida adiga iyo kuwa aad jeceshahay dareemaysaan hadda. Waxaa laga yaabaa inaad dareento cidlo, wareer, iyo culays. Waxaa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada iyo waxa dhici doona, jir ahaan iyo dareen ahaanba. Waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno.

Boggayaga internet-ka waxa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo kabashada jireed iyo shucuureed ee kadib uur ektoobiga. Degelka waxa ku jira xog caafimaad oo saxa sidoo kale waxaa ku jira macluumaad ku saabsan adeegyadayada taageerada kala duwan halkaas oo aad nala wadaagi karto khibradahaaga su'aalana na weydiin karto. Haddii aad u malaynayso inaan ku caawin karno, fadlan booqo degelkeena, iimayl noo soo dir ama na soo wac.

Fadlan booqo ectopic.org.uk si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageero.



Somali
Maareynta
Qalliinka

Surgical Management

The
Ectopic
Pregnancy
Trust



Publication date: November 2021
Website: ectopic.org.uk
Helpline: **020 7733 2653**
Email: ept@ectopic.org.uk
Registered charity number:1071811



The
Ectopic
Pregnancy
Trust



For healthcare professionals: To request further leaflets, please contact leaflets@ectopic.org.uk or call 020 7096 1838 or text to 07537 416085



Waan ka xunnahay in xirfadlahaaga daryeelka caafimaad uu kugu wargeliyay inaad leedahay uur ektoobiga.

Waxay noqon kartaa waqti caadifad ahaan iyo jidh ahaanba adag waxaana laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan daaweyntaada iyo waxa kugu dhici doona. Waxaa jira siyaabo kala duwan oo uurka ektoobiga loo daaweyn karo marka, waxa aan waraaqdan kaga hadli doonaa oo kaliya su'aalo la xidhiidha **ku maareynta uurka ektoobiga** hab qalliina.

Waxaad macluumaad dheeraad ah iyo taageero ka heli kartaa halkan www.ectopic.org.uk.

Waa maxay maareynta qalliinku?

Maareynta qalliinka ayaa ah qaabka ugu badan ee loo daweyno uurka ektoobiga macnaheeduna waa in la sameeyo qalliin si meesha looga saaro uurka ektoobiga adiga oo ku jira suuxdin guud.

Haddii hoormoonka uu sameeyo uurku (beta hCG) uu sarreeyo, uurka ektoobiguna weyn yahay, ama dhiig-bax ballaadhan oo gudaha ah lagu arko sawirkaaga, dhakhaatiirtu ma tixgelin karaan daaweyn ka hawl-yar qalliinka maxaa yeelay caafimaadkaaga ayaa laga yaabaa inuu halis degdeg ah ku jiro sidaas darteedna qalliinku uu yahay wadada kaliya ee la heli karo. Qalliinka ayaa sidoo kale la samayn karaa haddii maareynta filashada ama maareynta daawadu aanay waxtar lahayn.

Goorma ayaa qalliinku ugu habboon yahay?

Dhakhaatiirtu waxay soo jeedin doonaan in qalliinku uu yahay daaweynta kuugu fiican haddii:

- Hormoonka uu sameeyay uurku (beta hCG) uu sarreeyo;

- Sawirkaagu uu muujiyo in uurka ektoobigu weyn yahay; ama

- Dhiig-bax weyn oo gudaha ah lagu arko sawirkaaga.

Haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadahan, dhakhaatiirtu ma tixgelin karaan daaweyn ka hawl-yar qalliinka maxaa yeelay caafimaadkaaga ayaa laga yaabaa inuu halis ku jiro.

Muxu qalliinku ka koobnaan doonaa?

Taariikh ahaan, qalliinku wuxuu ku lug lahaa jeexitaanka ubucda (jeexitaan furan) oo lagu sameynayo halka hoose ee ubacda, oo ka sarraysa xariiqaa uu ku beegmo hoos-gelisku. Qalliinka noocan ah ayaa wali marmar loo baahan yahay haddii uu jiro dhiig -bax/dillaac culus oo gudaha ah ama nabaro badan oo soo gaadhay nudaha si degdega ah ayaana loo sameeyaa.

Xaaladaha badankood, nooca qalliinka waxa loo maraa farsamo la yiraahdo laproscopy (qalliin daloola). Tani waxay u dhacdaa iyada oo la gelinayo kamerad xuddunta (badhanka caloosha) lana gelinayo aalado iyada oo loo marayo laba jeexitaan oo laga sameeyo dhinaca hoose ee ubucda (caloosha). Qadar yar oo gaas ah ayaa la gelinayaa godka calooshaada si uu u fido si uu dhakhtarka qalliinku u arko caloosha dhexdeeda

Labada farsamoodba waxay awood u siinayaan dhakhtarka qalliinka inuu baaro godka caloosha laakiin qalliinka kaliya ah dalool hore ayuu u bogsadaa. Haddii uu jiro dhiig-bax ballaadhani, dhiig-ku-shubid ayaa laga yaabaa in loo baahdo.

Sidee loo daaweyn doonaa uurka ektoobiga?

Waxaa jira laba hab oo ay tahay in dhakhtarka qalliinku doorto midkii la doortaana waxa ay ku xirnaan doontaa dhaawaca soo gaadhay Ugxan-mareenka iyo xaaladda uu ku sugan yahay. Haddii Ugxan-mareenku aanay waxba soo gaadhin oo uu noqdo sidii la filayay, qalliinka ugu dhow ayaa ah in Ugxan-mareenka ay ku jirto uurka ektoobigu la saaro (waxaana loo yaqaannaa Saarista-ugxan-mareenka). Haddii Ugxan-mareenka kale aysan ahayn sidii la filayay markaas qalliinka ugu dhow ayaa ah in laga saaro uurka ektoobiga Ugxan-mareenka iyadoo la samaynayo jeexdin yar, lana daynayo Ugxan-mareenka (waxana loo yaqaana Jeexista-ugxan-mareenk).

Nasiib darrose, si kastaba ha ahaatee, mar walba suurtagal ma aha in la sameeyo Jeexista-ugxan-mareenka marka ay jiraan walaac ku saabsan In wax ka qaldan yihiin Ugxan-mareenka kale. Marka la eegayo jeexista-ugxan-mareenka, waxaa jira halis yar oo ah in qaar ka mid ah unugyada uurku ay ku sii jiraan ugxan-mareenka waxaana lagugula talin doonaa in lagugu sameeyo baaritaanno dhiiga si toddobaadle ah si loola socdo heerarka hCG-ga maaddaama ay hoos u dhacaan marka uurku si buuxda u baaba'oo. Xaalado tiro aad u yar ah, ayaa laga yaaba sidoo kale in loo baahdo in lagu daaweeyo daawo la yiraahdo methotrexate, ama qalliin dheeraad ah ayaa loo baahan haddii heerarka hCG uusan hoos u dhicin.

Kooxdaada caafimaadka waa inay ka wada hadlaan waxa ku dhacaya uurka lagaa saaray. Cadka uurka waxaa sida caadiga ah loo diraa shaybaar si loogu sameeyo baaritaan la yidhaa histopathology oo ay ku jirto hubinta

nooca uurka ee dhifta ah ee loo yaqaan uurka madhan. Marka shaybaarku sameeyo tan, hadhaaga ayaa si sharaf leh loo aasi doonaa, iyadoo la raacayo rabitaankaaga iyo xulashooyinka laga heli karo isbitaalkaaga.

Intee in le'eg ayaan isbitaalka joogi doonaa?

Waxay u badan tahay inaad isbitaalka joogto hal ama marmar laba maalmood qalliinka laparoscopy ka dib (dalool-yar) ama laba ilaa saddex maalmood qalliinka laparotomy ka dib (jeexista caloosha hoose). Haddii dhiiggaagu uu yahay Rhesus taban markaas waxaa lagu siin doonaa irbadda ka-hortag D si looga hortago dhallaanka mustaqbalka inay dhiig -yari yeeshaan xilliga uurka.

Marka lagaa saaro isbitaalka, shaqaalaha waadhka ayaa kaala talin doona daryeelka dambe, jimicsiga iyo cuntada. Tolmadu badiyaa waa iska baaba'aan waana inay baaba'aan hal toddobaad kadib. Mararka qaarkood si tartiib ah ayay u baaba'aan oo haddii ay ku dhibayaan, waa laga saari karaa toddobaad kadib. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato nuqul ka mid ah qoraallada qalliinkaaga si aad ugu haysato diiwaannadaada. Kuwani waxay kaloo noqon karaan kuwo aad waxtar u leh in aad haysato haddii aad guurto ama aad isbitaal kale tagto waqti kasta oo mustaqbalka ah si aad ula wadaagto kooxdaada caafimaadka.

Sidee bay dhakhaatiirtaydu i ilaalin doonaan?

Haddii lagugu sameeyo jeexista ugxan-mareenka (oo ugxan-mareenku wali meeshiisa ku jiro), ama haddii ay jirtay shaki ah in dhammaan cadka uurka la saarin, dhakhaatiirtaadu waxay badiyaa tijaabin doonaan heerarka hCG -gaaga si loo hubiyo inay hoos u dhacayaan.

Xaaladdan oo kale, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto in mar labaad la baaro heerarka hCG -ga dhiiggaaga toddobaad ka dib, waxaana suurtoogal ah in intas ka badan.

Haddii lagugu sameeyo jeexista ugxan-mareenka (oo ugxan-mareenka laga saaro meeshiisa), dabagal badanaa looma baahna in kastoo mararka qaarkood aan lagu arkin unugyada madheerta marka ugxan-mareenka lagu baaro weyneeye (mikroskoob), markaas waxa aad u baahnaan doontaa in laga baaro dhiigga heerarka hCG-ga haddii baaritaanka uurkaagu uu weli yahay mid togan. Tani waxa loo sameynayaa si loo hubiyo in uurka ektoobiga gebi ahaanba la saaro oo la daweeyo.

Isbitaallada qaarkood waxay ku weydiistaan inaad ku soo noqoto ballan bukaan -socoda qiyaastii lix toddobaad qalliinka ka dib si loo hubiyo in calooshaadu si fiican u bogsatay iyo in laga jawaabo wixii su'aalo ah ee aad qabto. Haddii aan lagu siinin ballan soo-noqosho ah, dhakhtarkaaga ama dhakhtarkaaga cudurada guud (GP) waxay u badan tahay inuu jeclaan lahaa inuu ku arko qiyaastii lix toddobaad ka dib, ama ka hor intaadan ku noqon shaqada, si uu u sameeyo baaritaanka qalliinka kadib si loo hubiyo inaad si fiican u bogsatay.

Sideen dareemi doonaa qalliinka kadib?

Dadka badankood waxay la kulmaan xanuun inta lagu jiro 1 ilaa 2 toddobaad ee ugu horreeya qalliinka ka dib waxaana lagu daaweyn karaa xanuun baabiye.

Waxaad dareemi doontaa daal, gaar ahaan haddii dhiig badani kaa baxay intii qalliinku socday. Haddii lagugu shubay dhiig, waxaa laga yaabaa in

lagu siiyay kiniinno bir ah oo ka dhigi doona saxarada madow lagana yaaba in caloosha ku adkaato (calool istaag).

Haddii lagugu sameeyay laparoscopy, waxaad u badan tahay inaad dareentid calool-xanuun toddobaadka ugu horreeyay oo leh xanuun la mid ah marka hawo kugu jirto. Tan waxaa sabab u ah gaaska la isticmaalo inta lagu jiro qalliinka.

Maxaan samayn karaa si ay iiga caawiso inaan ka bogsado qalliinka?

Maalmaha ugu horreeya qalliinka ka dib, waxaa muhiim ah in la isku dayo in tartiib tartiib loo socdo. Hubi inaad si joogto ah u socotid oo aad kordhisid masafooyinka gaagaaban ee aad socoto maalinba maalinta ka sii danbeysay.

Kalkaaliyayaashaada caafimaadku waxay kuu sheegi doonaan wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ka ogaato maareynta goobaha nabarkaaga, tusaale ahaan, haddii tolmaddu tahay mid iska baaba'aysa ama haddii aad u baahan tahay inaad soo noqoto si lagaaga furo iyo goorta.

Goobta nabarkaaga nadiif ka dhig. Si joogto ah ayaad u qubaysan kartaa oo si ammaan ah ayaad u qubaysan kartaa 48 saacadood qalliinka ka dib haddii aan si kale lagu sheegin. Waa fikrad wanaagsan inaad hubiso inuu qof kula joogo guriga marka ugu horraysa ee aad maydhato haddii ay dhacdo inaad u baahato caawimaad si aad mar kale u baxdo.

Waa inaad qaadin wax culus ama qaban hawl adag oo guriga ah ilaa laba toddobaad waana inaad samaysaa jimicsi fudud sida socodka, iyo dabaasha dabacsan, marka nabarada

